



The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/309/06/2021

Tariikh:19/06/2021

Magacaabidda Guddiga Maamulka Doorashooyinka Xildhibaanada Labada Aqal ee ka Soo jeeda Soomaaliland

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

Markuu Arkay: Qodobbada 99-aad iyo 100-aad ee Dastuurka Ku-Meel-Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,

Markuu Arkay: Habraaca hirgelinta heshiiska siyaasadeed oo ay si wadajir ah u gaareen Madaxda Dowladda Federaalka iyo Madaxda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka 1st **Oktoober 2020**, ee hagaya dhismaha Guddiga Maamulka Doorashada Dadban ee 2021.

Markuu Arkay: Qodobka 3aad ee Habraaca Hirgalinta Heshiiskii Siyaasadeed ee ay Saxiixeen Madaxda Dowlada Federaalka iyo Madaxda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda JFS, kaas oo qeexaya in Guddiga Maamulaya Doorashada Soomaaliland ay soo magacaabeyso Xukuumada JFS.

Markuu La Tashaday: Siyaasiyiinta ka soo jeeda Gobolada Waqooyi ee Soomaaliland.

Qod. 1^{aad}

Magacaabid

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, wuxuu dib u magacaabay xubnaha Guddiga Maamulaya Doorashooyinka Xildhibaanada Labada Aqal ee ka soo jeeda Soomaaliland, markii dib-u-eegis lagu sameeyey, ka dib heshiiskii **27 May,2021**, ay wada gaareen Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, kuwaasoo kala ah;

1. Khadar Xariir Xuseen
2. Sundus Ibraahim Cali
3. Maxamed Cali Cabdullaahi
4. Maxamed Cabdullaahi Jirde
5. Suleybaan Ceydiid Cusmaan
6. Axmed Xuseen Ciise
7. Najiib Xuseen Samaale
8. Cabdishakuur Abiib Xayir
9. Jaamac Cumar Cali
10. Sagal Cabdullaahi Maxamed
11. Amal Mustafe Muuse

[Handwritten signature]

Qodobka 2aad

- B. Guddiga Doorashooyinka Xildhibaanada Gobollada Waqooyi ee Soomaaliland waxa ay ka mas'uul yihiin in ay qabtaan Doorashooyinka Xildhibaanada ka soo jeeda Soomaaliland ee labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare).
- T. Guddigan waxaa lagu daray Saddex (3) Xubnood oo ay soo magacowday Xukuumadda JFS, si waafaqsan Heshiiskii Siyaasadeed ee ay Saxiixeen Madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Madaxda Dowladaha Xubnaha ka ah DFS.


Qodobka 3aad

Dhaqan-galka Xeerka

Magacaabidani waxa ay dhaqan-galeysaa isla marka uu saxiixo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS.

Fulin Wacan,




Mudane: Maxamed Xuseen Rooble
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada JFS